DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 21AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 04/08/21 | Lam. 02 |
|---|---|---|---|

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA XARUNTA MAAREYNTA XOGAHA KHAYRAADKA BIYAHA IYO DHULKA DOWLADDA PUNTLAND


| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

**Sharci Lr.02 ee 4[ta] Agoosto 2021, kuna saabsan Sharciga Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka biyaha iyo dhulka Puntland**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80[aad]

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay **XGGW/DPL/41/2021**, kuna taariikhaysan **July 22, 2021.**

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1[aad]**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Xarunta Maareynta Khayraadka biyaha iyo dhulka Puntland.

**Qodobka 2[aad]**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland

**Qodobka 3[aad]**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/41/2021** **Garoowe, Khamiis,** **Taariikh: - 22/07/2021**

**Ku: - Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:-**Ansixinta Xeerka Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

**MARKUU ARKAY: -** Soo gudbinta Madaxweyne ku-xigeenka Ref: XMWK/DPS/264/2021 ee Feb, 6, 2021 kuna saabsanaa Ansixinta Xeerka Xarunta Maareynta Macluumaadka Xogaha khayraadka Biyaha iyo Dhulka.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay Asaasidda Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Puntland.

**MARKUU ARKAY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 48-aad fadhigiisii 7-aad ee 27.06.2021 cod gacan taag ah (**48**) Mudane ku ansixiyeen Xeerka Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Puntland, diidmo majirin (**0**), halka uu ka aamusay hal (**1**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

## GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# XEERKA XARUNTA MAAREYNTA XOGAHA KHAYRAADKA BIYAHA IYO DHULKA PUNTLAND

## LUULIYO, 2021

## GAROOWE, PUNTLAND, SOOMAALIYA

**Tusmo** **Bogga**

Erey Bixin....1
Qodobka 1-aad....2
Magaca Xeerka....2
Qodobka 2-aad....2
Baaxadda Xeerka....2
Qodobka 3-aad....2
Ujeeddada Xeerka....2
Qodobka 4-aad....2
Madaxbannaanida Xarunta....2
Qodobka 5-aad....2
Shaqada Xarunta....2
Qodobka 6-aad....3
Qaab Dhismeedka Maamulka Xarunta....3
Qodobka 7-aad....3
Xilka iyo Waajibaadka Guddiga sare....3
Qodobka 8-aad....4
Kulamada Guddiga....4
Qodobka 9-aad....5
Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Xarunta....5
Qodobka 10-aad....5
Shaqaalaha Xarunta....5
Qodobka 11-aad....5
Iskaashiga iyo Wada Shaqaynta Xarunta iyo Hay'adaha Kale....5
Qodobka 12-aad....5
Wax Soo Saarka iyo Adeegyada Xarunta....5
Qodobka 13-aad....6
Ilaha Dakhliga....6
Qodobka 14-aad....6
Xafiisyada Xarunta....6

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**Qodobka 15-aad** ........................................................................................6
**Burin**........................................................................................................6
**Qodobka 16-aad** ........................................................................................6
**Dhaqan-galka Xeerka**.................................................................................6

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

# Erey Bixin

Haddii aan Xeerkan si kale loogu sheegin, macnaha ereyada soo socda waxaa loola jeedaa sidan:

| Lr. | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 2. | **Xeer** | Waxaa loola jeeda Xeerka Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka puntland. |
| 3. | **Xarunta** | Waxaa loola jeeda Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka. |
| 4. | **Agaasime** | Waxaa loola jeedaa Agaasimaha xarunta. |
| 5. | **Xog** | Waxaa loola jeedaa xog wadajirta oo habeysan kuna saabsan khayraadka biyaha iyo dhulka Puntland. |
| 6. | **Xogta khayraadka biyaha** | Waxaa loola jeedaa xogta biyo-roobaadka, qulqulka webiyada, togagga biyaha laga helo iyo dhulka dushiisa iyo hoostiisa. |
| 7. | **Xogta khayraadka dhulka** | Waxaa loola jeedaa kheyraadka iyo isticmaalka dhulka, habka dhulka, oogada dhulka, dabeecadaha ciidda iyo habboonaanta dhulka. |
| 8. | **Bixinta xogta saadaasha biyaha** | Waxaa loola jeedaa bixinta xogaha ku saabsan khayraadka biyaha iyadoo diiradda la saarayo ilaha biyaha dabiiciga ah, tayada biyaha waraabka, kala duwanaanshaha cimilo xilliyeedka saadaasha iyo xogaha digniinaha degdegga ah ee daadadka iyo abaaraha. |
| 9. | **Bixinta xogta khayraadka dhulka** | Waxaa loola jeedaa bixinta xogaha ku saabsan khayraadka dhulka iyadoo la adeegsanayo uruurinta iyo lafa-gurka xogta ku saabsan isticmaalka dhulka, adeegsiga dhulka iyo ku habboonaanta, qaababka dhulka iyo cilmiga daraasadda dhulka, tayada ciidda, diiwaangelinta iyo la socodka isbeddellada nabaad-guurka dhulka. |
| 10. | **Maareynta xogaha** | Waxaa loola jeedaa sameynta habraacyo, hagayaal iyo tilmaamo loo adeegsado kaydinta xogta iyo habeynta, maareynta iyo marin u helka. |
| 11. | **Meel fog ka cabirid (remote sensing)** | Waxaa loola jeedaa habka lagu ogaanayo lagulana soconayo astaamaha dhul iyadoo la cabbirayo shucaaca meesha ka muuqda iyo masaafada fog. |
| 12. | **Habka xogta dhulka (GIS):** | Waxaa loola jeedaa aalad kumbuyuutareed oo lagu sawiro ama lagu khariidadeeyo, laguna falanqeeyo astaamaha dhulka iyo dhacdooyinkiisa. |
| 13. | **Isku-dhafka maaraynta khayraadka biyaha iyo dhulka** | Waxaa loola jeedaa hannaan kor u qaada horumarka isku-dubbaridan ee maareynta biyaha, dhulka iyo Kheyraadka la xiriira, si kor loogu qaado daryeelka bulshada iyo barwaaqeynteeda iyadoo loo marayo hab waara oo muhiim u ah sare u qaadidda samo deegaaneedka. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 1-aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Puntland".

## Qodobka 2-aad

## Baaxadda Xeerka

Baaxadda xeerkani waxay ku fidsan tahay dhulka Puntland oo dhan, waxaana lagu dhaqayaa dhismaha iyo guud ahaan arimaha maamulka Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka Puntland.

## Qodobka 3-aad

## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkan waxaa kamid ah:-

1. Helidda hanaan dawladeed oo ku aaddan maamulka Xarunta iyo awood qorshaysan oo hirgelisa barnaamijyada maareynta xogaha khayraadka biyaha iyo dhulka.
2. Dhisidda adkaysiga bulsho, dhaqan-dhaqaale iyo degaan iyo hubinta yareynta saboolnimada, koritaanka joogtada ah ee maamulka iyo ilaalinta fayow-qabka degaanka.

## Qodobka 4-aad

## Madaxbannaanida Xarunta

Xaruntu waa hay'ad dowladeed oo maamul ahaan madax bannaan, lehna shakhsiyad qaanuuneed, waxayna raacsantahy siyaasad ahaan wada shaqaynna leeyihiin hay'adaha kala ah;-

1. Wasaaradda Tamarta, Macdanta iyo Biyaha.
2. Wasaaradda Deegaanka, Beeraha iyo Isbedelka Cimilada.
3. Wasaaradda Xannaanada Xoolaha.
4. Wasaaradda Qorsheynta, Xiriirka Caalamiga ah iyo Horumarinta Dhaqaalaha.
5. Hay'adda Gargaarka iyo ka Hortaga Masiibooyinka (HADMA).

## Qodobka 5-aad

## Shaqada Xarunta

Shaqada xarunta waa:-

1. Xog helista, ururinta, habaynta, falanqaynta, muujinta iyo soo bandhigidda xogaha ku saabsan khayraadka biyaha iyo dhulka, si loo gaaro horumar waara.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

2. Isku xirka hay'adaha wada shaqaynta la leh Xarunta iyadoo helaysa taageero siyaasadeed, si loo gaaro maareyn waarta ee xogaha khayraadka biyaha iyo dhulka.
3. Inay xaruntu siiso hay'adaha kale ee wada shaqaynta la leh xogaha khayraadka Biyaha iyo dhulka.
4. Samaynta iyo hirgelinta barnaamijyada lagu ururinayo laguna habaynayo xogta, iyadoo lala kaashanayo hay'adaha kale ee ay khusayso ka qayb qaadashada dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha horumarinta biyaha, khayraadka kale ee dhulka iyo ilaalinta deegaanka.
5. Samaynta daraasado sahmin si loola socdo xaalufka, khayraadka biyaha iyo dhulka, iyadoo la adeegsanayo qalabka ay ka mid yihiin habka meel fog ka cabiridda (remote sensing) iyo habka xogta dhulka ee (GIS) iyadoo lala kaashanayo hay'adaha dawladda ee ay khusayso.
6. Ilaalinta iyo cusboonaysiinta bangiyada kaydka xogaha biyaha iyo khayraadka kale ee dhulka.
7. Bixinta adeegyo kale sida tababaro iyo la talin.
8. Xoojinta wada shaqaynta la xiriirta maareynta xogaha khayraadka biyaha iyo dhulka ee heer gobol, heer qaran iyo heer caalamiba, si loo xaqiijiyo maareyn wax ku ool ah oo wax tar u leh dhinacyada oo dhan.
9. Xaruntu waxay gacan hagar la'aan ah ka geysaneysaa mashruuc kasta oo la xiriira xogta biyaha iyo dhulka oo ay hirgelineyso hay'ad dowladeed.

## Qodobka 6-aad

## Qaab Dhismeedka Maamulka Xarunta

Xaruntu waxay yeelanaysaa:

1. Guddi sare oo ka kooban hay'adaha lagu xusay qodobka 4-aad ee xeerkan.
2. Agaasinka guud ee maamulka xarunta.

## Qodobka 7-aad

## Xilka iyo Waajibaadka Guddiga sare

Guddigu Sare ee Xarunta wuxuu yeelanayaan shaqooyinka iyo waajibaadka soo socda:-

1. Kormeeridda habsami-u-socodka hawlaha Xarunta.
2. Meelmarinta xeer nidaamiyeyaasha iyo siyaasadaha muhiimka u ah habsami u socodka hawlaha Xarunta.
3. Inay oggolaadaan, dib-u-eegis ku sameeyaan ayna si xilliyaysan u cusbooneysiiyaan istaraatiijiyada, qorshaha, shaqada iyo barnaamijyada.
4. Oggolaanshaha codsiga iyo habka shaqaalaysiinta sida uu qabo xeerka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda, tirada shaqaalaha iyo qaab dhismeedka shaqada Xarunta ee uu soo gudbiyo Agaasimaha Xarunta iyo wax-ka-bedelka muhiimka ah si loo fuliyo ujeeddooyinka Xarunta.



XAFIISKA XEERILAALIYAHA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

5. Oggolaanshaha soo jeedinta agaasimaha xarunta ee ku aaddan dhismaha maamulka xafiiska sida abuuridda, baabi'inta iyo isku dhafka waaxaha iyo qaybaha.
6. Suurta gelinta iyo u qoondaynta dhaqaale ku filan oo loogu talagelayo habsami u socodka hawlaha Xarunta marka la dejinayo miisaaniyadda dawladda sannad walba.
7. Go'aaminta gunnooyinka la siinayo shaqaalaha iyo hawl-wadeennada xarunta iyo qof kasta oo heshiis shaqo lala galo si waafaqsan xeerarka shaqaalaha rayidka ah.
8. Go'aaminta qiimaha iyo khidmadaha wax soo saarka iyo adeegyada ay Xarunta u fidiso isticmaalayaasha xogta.
9. U gudbinta Galaha Xukuumadda hindse xeereedyada iyo siyaasadaha la xiriira Xarunta.
10. U hawl-gelidda xiriirka iyo xoojinta wadashaqeynta hay'adaha taageera Xarunta.
11. Go'aaminta codsiga iyo aqbalaadda tabarucaadka, deeqaha, hadiyadaha iyo amaahda laga helo gudaha iyo dibedda si loogu fuliyo hawlaha Xarunta.
12. Hubinta soo gudbinta xisaab-celin dhammeystiran ee kharashaadka ku baxay hawlihii la qabtay.
13. Inay u idman karaan agaasimaha inuu ka caawiyo fulinta hawlaha ay u-xil-saaran yihiin.
14. Qabashada hawl kasta oo kale oo aan ka baxsaneyn waajibaadkooda shaqo, lagama maarmaanna u ah fulinta ujeeddada Xeerkan.

## Qodobka 8-aad

## Kulamada Guddiga

1. Guddiga Sare ee Xaruntu waxay kulmayaan afar (4) jeer sannadkii, guddiga ayaana go'aaminaya xilliga kulamada, kamana reebbana inuu qabsado kulamo dheeri ah.
2. Guddigu waxa uu fursad u siin karaa ka qayb-galka shirarka qaarkood daneeyayaasha gudaha iyo kuwa dibadda ee taageera, si ay ula socdaan wax-qabadka iyo habsami u socodka hawlaha Xarunta.
3. Shir-guddoonka Guddiga waxaa dooranaya xubnaha guddiga sannadkiiba mar, iyadoo ay noqonayso meerto ka dhaxaysa dhammaan xubnaha guddiga, waxaa uuna u-xil-saaran yahay diyaarinta ajandayaasha, guddoominta shirarka iyo u gudbinta Golaha Xukuumadda hindise Xeereedyada iyo Siyaasadaha la xiriira shaqada xarunta.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

## Qodobka 9-aad

## Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Xarunta

1. Xaruntu waxay yeelaneysaa Agaasime guud oo ka mas'uul ah maamulka Xarunta, waana madaxa ugu sarreeya ee hawl fulinta xarunta, wuxuuna hirgeliyaa qorshayaasha iyo barnaamijyada xarunta.
2. Agaasimaha Xarunta waxaa lagu qaadanayaa tartan imtixaan oo furan, si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka ah, waxaana qofka ku guulaysta lagu soo saarayaa xeer Madaxweyne.

## Qodobka 10-aad

## Shaqaalaha Xarunta

1. Xaruntu waxay yeelanaysaa hawl-wadeenno iyo shaqaale, waxaana lagu xulanayaa hab tartan ah oo furan kuna salaysan aqoon iyo karti, si waafaqsan Xeerka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.
2. Mushaharka, gunnooyinka iyo xaquuqaadka kale ee shaqaalaha xarunta waxaa lagu jaan goynayaa sida uu qabo xeerka shaqaalaha.
3. Xaruntu waxay kaloo hawlgelin kartaa shaqaale ka yimi hay'adaha kale oo si ku meelgaar ahna ugu soo biiray xarunta, kuwaasoo aan noqonayn shaqaale rasmiya oo ka tirsan xarunta, waxayna ku sugnaanayaan xaaladdoodii shaqaalenimo ee hore, iyagoo hay'adihii laga soo wareejiyey ku yeelanaya wixii xaquuq ah oo ay ka qaadan jireen sida mushahar, gunno iyo wixii la mid ah.
4. Xarunta waxay adeegsan kartaa shakhsiyaad kale sida khubaro, la-taliyayaal iyo kuwo kalaba haddii loo baahdo waxayna ka iman karaan hay'adaha ay wadashaqaynta leeyihiin.

## Qodobka 11-aad

## Iskaashiga iyo Wada Shaqaynta Xarunta iyo Hay'adaha Kale

1. Xarunta waxay wadashaqeyn la yeelaneysaa hay'adaha kale ee dawladda, si ay ugu guuleystaan ujeeddada xog ururinta iyo hirgelinta hawlahooda.
2. Guddiga sare ee xaruntu wuxuu qaabeynayaa habkii ay xogaha isku waydaarsan lahaayen hay'adaha kale ee u-xil-saaran ururinta xogaha sida Deegaanka, Biyaha, Xoolaha, Beeraha iyo Xogaha Masiibooyinka.

## Qodobka 12-aad

## Wax Soo Saarka iyo Adeegyada Xarunta

1. Xaruntu waxay bixinaysaa adeeg u furan qof kasta oo lacag la'aan ah iyo wax soo saar adeegyo la iibsado.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

2. Xaruntu waxay khidmad saaraysaa wax soosaarka iyo adeegyada ay bixiso hadba qiimaha ku habboon oo uu go'aaamiyo Guddiga Sare.
3. Wax soo saarka iyo adeegyada la xiriira xogaha la aruuriyay ee aan lahayn waxyeello dareen leh, xogaha khatarta leh iyo musiibooyinka waxay dadweynuhu ku helayaan lacag la'aan.
4. Dhammaan wax soo saarka iyo adeegyada oo ay ku jiraan Xogaha ay aruurisay, habeysay ama keydisay Xaruntu waxay noqonayaan kuwo ay ku helaan lacag la'aan hay'adaha ay wadashaqaynta leeyihiin Xarunta, si waafaqsan habka siyaasad-wadaagga xogta dawladda.
5. Deeq bixiyayaasha taageera xarunta waxay ku helayaan xogta wax soo saarka iyo adeegyada Xarunta lacag la'aan, si waafaqsan habka Xog wadaaga dawladda iyo deeq bixiyayaasha inta lagu gudo jiro muddada maalgelinta.
6. Khidmadda ay qaado xaruntu waxay ka mid noqonaysaa dakhliga guud ee dawladda, waxaana looga faa'iideysanayaa fulinta hawlaha xarunta iyo in lagu xaqiijiyo sii jiritaankeeda iyadoo la raacayo hab xisaabaadka dawladda.

## Qodobka 13-aad

## Ilaha Dakhliga

Ilaha dakhliga xaruntu waxay noqonayaan Miisaaniyadda dawladdu u qoondayso, dakhliga ay Xaruntu ka soo saarto wax soo saarka iyo adeegyada, tabarucaadka, deeqaha, hadiyadaha iyo amaahda laga helo ilaha gudaha iyo kuwa dibadda

## Qodobka 14-aad

## Xafiisyada Xarunta

Xafiiska guud ee xaruntu waxa uu noqonayaa caasimadda dawladda puntland ee Garoowe, waxayna laamo ku yeelan kartaa Gobollada Puntland.

## Qodobka 15-aad

## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 16-aad

## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.